Washington State Department of Social & Health Services

Fursadaha Kala Doorasho ee loogu talagalay Soo Ururinta Taageerada Ilmaha marekaad qaadato Caawimaad Ku-Meelgaar ah ee Qoysaska Baahiyeysan (TANF)

Your Options for Child Support Collection while Receiving Temporary Assistance for Needy Families (TANF)

Haddii ayna badbaado u lahayn adiga ama carruurtaada mooyee, sharciga ayaa faraya inay adiga waajib kugu tahay inaad caawiso Waaxda Adeegyada Bulshada Iyo Caafimaadka (DSHS), sidii ay u soo ururin lahayn taageerada ilmaha markaad heshaan TANF adiga iyo caruurtaaduba. DCS waxay bixisaa adeegyada meelmarinta taageerada oo dhammeystiran marka aad heshid TANF. Adeegyadan waxaa ka mid ah DCS oo meelmarinaysa waajibaadka waalidka kale si ay u bixiso caymis caafimaad iyo gacan ka geysashada qaytiisa/qaybteeda kharashaadka caafimaadka aan la cayminin ee cunugaaga (carruurtaada).

Maxaa ah inaan sameeyo inaan ka caawiyo DCS sidii ay u soo ururin lahayd caawimada ilmaha?

- Magaca waalidka(iinta) ilmaha (carruurta).
- Annaga na sii macluumaadka naga caawinaya sidii loo heli lahaa waalidka(iinta).
- Ka caawiso caddaynta kuwa waalidka(iinta) ilmaha (carruurta) u yahay.

Maxay faa'iido u leedahay dhidibka aabbonimada iyo ururinta ilmaha taageeradiisa?

- Sababtu waa iyada oo taageerada ilmaha kaa caawin karto adigu inaad gaarto isku-filnnaan.
- Sababtu waa iyada oo siineysa ilmahaaga/carruurtaada taariikh caafimaad iyada oo la garto qofka waalidku yahay.
- Sababtu waa iyada oo siineysa ilmahaaga xuquuq sharciyeed oo ah dhaxalka, haqbeelka beesha (social security), waxatarrada ciidamada iyo waxyaabaha kale kaaga bannaan dawladda.

Maxaa dhacaya haddii anigu aanan iskaashad la sameyn DCS?

Haddii aad ka caawin weydo DCS sidii ay u soo ururin lahayd taageerada ilmaha oo aan laguu oggolaan "Go'aan Sabab Sharci ah", lacagta kaash ah ee lagu siiyo ayaa laga yaabaa in la naaquso illaa 25%.

Markay "habboon" tahay inaadan iskaashi la samayn DCS.

Ma aha adigu inaad gacan ka geysato sidii loo ururin lahaa taageerada ilmaha haddii shaqaalahaaga Xafiiska Adeegyada Beesha (CSO) go'aamiyo inaad haysato adigu sabab sharci ah inaadan arrinta caawimo ka geysan. Sababaha Sharciga ahi waa:

- Adiga oo cabsi ka qaba in adiga ama ilmahaaga/carruurta aad daryeesho aad si daran waxyeello jir ama shucuur ahaan idiinku timaad.
- Ilmahaaga oo ku dhashay sabab kusfi ama geyitaan la'aan (incest)
- Adiga oo bilaabay qaabsocodka ilmo korsi, ama aad adigu kula jirto la-talin (illaa saddex bilood) hay'ad meeleyn ilmo arrimha ku saabsan korsasho.

Maxaan siiyaa shaqaalayga CSO inaan tuso anigu inaan u haysto Sabab Sharci ah inaanan caawin?

- Adiga oo saxeexay kelmado tilmaamaya cabsidaaada iyo welwelkaaga
- Waxa kasta oo diiwaangalin ah ee ay ka midka yihiin, caafimaadka, bileyska, ama diiwaanno kale oo ku saabsan shaeegashadaada badbaado, haddii ay jiraan.

Wali miyaa la ii soo ururin karaa taageerada ilmaha ilmaha in kasta oo aanan iskaashi la samayn DCS?

Haa sababta oo ah waxa jira laba nooc oo ah heerarka aad dooran karto; Heerka A ama Heerka B.

- Heerka A: Adiga lagu weydiisan *maayo* inaad iskaashi la sameyso DCS. Taageerada ilmaha ayaa la soo ururin doonaa.
- Heerka B: Adiga lagu weydiisan *maayo* inaad iskaashi la sameyso DCS *laakiin* taageerada ilmaha ayaa la soo ururin doonaa.

Maxaa sameeyaa anigu haddii ayna hadda badbaado ulahayn DCS inay soo ururiso taageerada ilmaha?

- Ula xiriir si deg-deg ah shaqaalahaaga CSO iyo sarkaalka DCS ee u qaabbilsan taagerada ilmahaaga. U sheeg labadaba xaaladdaada cusub.
- Weydiiso Sababta Sharciga ah adiga oo buuxiya foomkan.
- Haddii aad xaadirakn leedahay Sababta Sharciga ah ee heerka B, ka fikir inaad u beddelato Heerka A.
- Weydiiso u diritaan u-doodaha shaqaaqada qoyska goob-jooge ah ama ku tirsan beesha.

Maxaa dhacaya haddii aan ka soo horjeedo go'aanka sabab sharci ee CSO?

Waxaad xaq u leedahay adigu inaad weydiisato Dhageysi Maamuleed oo ku saabsan Go'aanka Sababta Sharciga ah. Dhageysiga Maamuleed ayaa ah dib-u-fiirin Go'aanka Sababta Sharciga ah. Eeg "Nidaamka Dhageysi Maamuleed" ee ku yaal bogga xiga si aad u hesho macluumaadka ku saabsan dhageysi maamuleed.

Haddii wax su'aalo ah aad ka qabto waxa ku saabsan ururinta ilmaha taageeradiisa, weydii kahor intaadan saxeexin foomkan. Sax ku samee mid kaliya kelmadaha ku qoran hoosta.

☐ Anigu waxaan aamminsanahay inay badbaado ii leedahay aniga iyo carruurteydaba inay DCS soo ururiso taageerada ilmaha. Waxaan fahansanahay inay waajib igu tahay ka caawiyo DCS ururinta taageerada ilmaha oo haddaan sidaa samayn waaayo in lacagta kaashka ah ee deeqda la iga naaqusi doono 25%.

☐ Anigu waxaan hasytaa sabab sharci ah inaanan gacan ka geysan. Fadlan ku sifee bogga xiga sababta adiga oo sharaxaya waxayaabaha aad ka cabsaneyso oo aad ka welwelsan tahay.

Fadlan sifee sababtaada aad ku weydiisaneyso Sabab sharci ah adiga oo sharaxaya waxayaabaha aad ka cabsaneyso oo aad ka welwelsan tahay.

Waxaan ku dhaaranayaa in kelmadaha korka ku tyaal run yihiin.

MAGACA MACMIILKA (DAABAC)	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
SAXIIXA MACMIILKA	TAARIIKH

Anigu waxaan siiyay macmiilka nuqul foomkan ah.

SAXIIXA SHAQAALE	TAARIIKH
MAGACA WAALIDKA AAN HAYN ILMAHA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
MAGACA ILMAHA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
MAGACA ILMAHA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
MAGACA ILMAHA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA

Nidaamka Dhageysi Maamuleed

1. Waxaad u wici kartaa Xafiiska Adeegyada Bulshada agagaarkaaga si aad u weydiisato keeskaaga in dib laguugu eego.
2. Waxaad u wici kartaa Xafiiska Adeegyada Beeshaada, ama u qori kartaa The Office of Administrative Hearings, PO Box 42489, Olympia, WA 98504-2489 gudahooda 90 maalmood si aad u weydiisato dhageysi. haddii aad weydiisato dhageysi, DSC ma bilaabi doonto ka shaqeynta keeskaaga illaa go'aanka dhageysiga la gaaro.

   Looyar ama qof kale oo aad doorato ayaa waliba wakiil adiga kuu noqon kara dhageysiga, ama adiga ayaa wakiil iska noqon kara.

Ma heli karaa la-talin sharci ama wakiil?

Waxaad uga wici kartaa khadka adeegyada sharci ee dhammaan gobol taleefanka 1-888-201-1014.